

## Tusmo

Horudhac _____	2
Sidii aad noola soo xidhidhi lahayd _____	4
Qaybta 1aad – Ballanqaadka hawlaha aan qabano _____	5
Qaybta 2aad - Bixinta kirada iyo dalbashada benefiitka _____	6
Qaybta 3aad – Hagajinta, dayactirka gaaska, dib uhabeyn iyo xayawaanka guriga lagu Xananeeyo _____	10
Qaybta 4aad – Dabeecadaha ka soo horjeeda bulshada, handadaadka iyo rabshadaha Guriga _____	13
Qaybta 5aad – Ilaalinta iska horimaadkajaarka _____	16
Qaybta 6aad – Haynta xayawaanka guriga lagu haysto _____	19
Qaybta 7aad - Habaynta guriga aad kujirto _____	20
Qaybta 8aad –Caymiska alaabtaguriga _____	21
Qaybta 9aad – Badbaadinta guriga aad deggan tahay _____	22
Qaybta10aad – Xaqa kireystaha oo kooban _____	24
Qaybta11aad – Mas’uuliyadda saaran kireystaha oo kooban _____	28
Maxaad iga fileysan bixinta kirada _____	27
Qaybta12aad – Degista guriga _____	31
Qaybta13aad – Ibsashada guriga _____	34
Qaybta14aad – Sida aad noogu sheegi lahayd baahidaada _____	36
Qaybta15aad – Gudbinta dacwadda amaba talada aad hayso _____	39
Qaybta16aad – Hawlaha muuhimka ah ee konsoolka _____	40
Qaybta17aad – Xidhiidhka kale _____	42

## **Horudhac**

Waxaad ku soo dhowaatan boogga tasmada ee Partners .Waxaanu soo habeynay warbixino muuhim ku ah dhinaca kireynta iyo degnaashaha hoyga aad leedahay. Waxaahaysibg rajeynaynaa iney kuu noqdan kuwo ku anfaca.

Waxaanu mahad celin u gudbineynaa xubnaha Ururka deggaanka iyo Homes for Islington (Kuwaaso hoogamiyaa guryaha laga kireysto amaba laga ibsado koonsoolka) sidii wacnayd ee ay wax ugu dareen buuggan.

### **Partners muxuu yahay?**

Sanadkii 2001 waxaa wada kulmay dhowr urur kuwaaso ku heshiiyey iney samaystaan "Partners for Improvement in Islington" Marka la soo gaabiyo loo yaqaan Partners. Waxaanu maamulna guryaha iyadoo aanu isticmaalno habka loo yaqaan "Private Finance Initiative" (PFI) (Bixinta amaahsa shaqsida). Guryaha aanu maamulno waxaa iska leh "London Borough of Islington" (Kowsaalka ama dawladda hoose).

### **Muxuu yahay "Private Finance Initiative" (PFI) (Maalgelinta Shaqsi ahaanedka)?**

PFIgu wuxuu isu keena lacagyo laga keeno qaybaha shaqsi ahaanedka iyo kuwa dawladda dhexeba laguna isticmaalo qaybaha hawgelinta mashaaricda bulshada. Dhinaca qaybta aanu maamulno waxay ku hawlan tahay dib u habeynta guryaha gobolka, ee ay kawsaalku leedahay.

Waxaad sii ahaan doonta kireyste ku jira guriga kawsaalka gurigaasi oo weli ah hanti ay kawsaalku leedahay. Mas'uuliyadda ku saaran waa mid la mid ah amaba saameeyaa guryaha ay leedahay kawsaalka. Haddii aad fahfaahin dheerad ah u baahatid dhinaca xuquuqda iyo mas'uuliyadda, waxaad dib ugu noqotaa heshiiskaagi ee aad la gashey cidda guriga leh. Dhinaca kiradana wax isbedel ah laguma samayn.

### **Sabaabta aad u dooran lahayd qorshaha PFI ga?**

Qorshaha PFIga waxaa doortey kawnsaalka kuna dooratey dib u habeynta guryaha gobolkaasi sidii loo gaadhsiin lahaa "Decent homes Standard" (Heerka Macquulka) ah ee Guryaha.

Dib u habeynta guryaha ku yaal waadooyinka wuxuu wax tar u leeyahay dadka Deggan. Wuxuu surta geliyaa in guryaha kawnsaalka lagu si isticmaalo guryenta bulshada, lasocodka guryo fara badan ee la kireystay ee xaafadda Islington.

### **Ururkee ayaa ka mid ah Partners (Isbahaysiga)?**

Hyde Housing Association wuxuu ka shaqeeyaa hawlaha maamulka guryaha.

**Rydon Property Maintenance Ltd** wuxuu qabtaa ka shaqeeyaa daayactirka joogtada ah ee guryaha.

**United House Ltd** wuxuu ka shaqeeyaa habeynta iyo hagaajinta qaybaha ka xumaada dhinaca kuleynta iyo biyaha.

**Halifax Bank of Scotland** wuxuu bixiyaa amahda lagu isticmaalo qorshaha.

## Sidii aad noola soo xidhidhi lahayd

### Isticmaalka Telefoonka

Inta u dhaxeysaa 8.30 aroornimo ilaa 5ta galabnimo, Isniin ilaa Jimcaha, waxaa xafisyada kala soo xidhiidhi kartaa lambaradan:

Telefoonka bilaashka ah 0800 587 3595

Qaybta dhexe ee Xafiiska 020 7288 8310

Minikoomka 020 7354 9121

Xiliyada aan la shaqeyn, gurmada degdeg ah, fadlan lahadal 0800 195 5255.

Telofoonada 0800 waa bilaasha kolka aad isticmaasho teleefonada guriga, hase ahaate isticmaalka moobiilka waa lacag ku xidhan kolba shirkadda aad ka tirsan tahay.

### Booqasho

Waxaan booqan kartaa xafisyada aanu leenahay inta u dhaxeysaa 8.30 aroornimo ilaa 5ta galabnimo, Insiinta ilaa Jimcaha, meelahan:

4-6 Colebrooke Place  
London N1 8HZ

iyo

Omnibus Workspaces  
United House  
North Road  
London N7 9DP

### Imeeylka

[enquiries@partnersislinton.net](mailto:enquiries@partnersislinton.net)

### Shabekadda aanu leenahay ee intarneeetka

[www.partnersislinton.net](http://www.partnersislinton.net)

Cidda i xiilsaaran kirada \_\_\_\_\_

Cidda i xiilsaaran Dakhluga \_\_\_\_\_

Xafiiska Isbahaysiga i Qaabilsan \_\_\_\_\_

Araar \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Sida aad u ogaatid cidda ku xiilsan kirada iyo dakhluga aad leedahay nagala soo xidhiidh cinwaanka halka sare ku qoran.

## **Qaybta 1aad – Ballanqaadka hawlaha aan qabano**

Haddii aanu nahay Partners (Isbahaysiga), waxaanu ku dadaalna sidii aanu u fidin lahayn hawl loo riyaaqo. Waxaanu mas'uul ka nahay dib u hagaajinta guryaha iyo bulshadaba, iyadoo aan u shaqeyso si hufan kuna xidhan iskaashi iyo di u habeyn.

### **Ujeedada aanu leenahay**

- Inaanu la shaqeyno cidda aanu wax qabadka la leenahay si aan u gaadho horumar muuqda.
- Inaanu wada shaqeyn isticmaalno
- Inaanu fidino dib u hagaajin wacan oo laga xajoon karo
- Inaanu habeyno guryaha gaadhsinna heerka loo baahan yahay
- Inaanu fidino hawlgaal qiimo u leh maamulka guryaha
- Inaanu fidino kala duwanshaha
- Inaanu dib u habeyn sameeyno

### **Hawsheenu waxay ballan qaadaysaa**

**Markasta ee aad macaamil nala yeelatid, inaanu:**

- Waxtar iyo asluub wanaag kuu muujino
- Aanu dhegeysano isla markaasina qiimeyno aragtidaada
- Aanu ku wedisano fikrada aad qabtid sidii aanu ugu isticmaali lahayn kor u qaadidda hawsha aanu qabano
- Inaanu su'aalaha aad qabtid si degdeg ah wax uga qabano, si caddaalad ku jirto iyo qiimeyn
- Inaanu u adeegno dadka kala duwan ee bulshada ka tirsan, iyadoo aan loo eegin jinsiyadda, nasabka, asliga, qabiilka, waddan, diin iyo imaanka uu qofku aaminsan yahay amaba da'da.

**Haddii aad nala xidhiidho, waxaanu:**

- Telefoonkaaga kaga jawiibi doona markuu lix jeer dhaco, magacana aanu ku sheegno
- Haddii ay xafiiska tahay, inaanu degdeg ku qaabilno, iyo si gaar ahaaned haddii aad u baahatid
- Inaanu waraaqaha kugu soo jawaabno 10 cisho gudohood
- Inaanu hubino inaad isticmaali kartid adeegga aanu fidino, loona eego baahidaada.

**Marka aanu ku soo booqano, waxaanu:**

- Kuu qaban doono ballan kugu haboon
- Inaanu ku ogeysiino haddiin aanu ka baxno ballan, amaba anoo soo raagi doono
- Inaanu kuu dhaafno farin, haddii aad ka maqatan guriga kuna sheegno sidii aad u sameynsan lahayd ballan cusub
- Inaanu mar kastaba sidano, kuna tuusno aqoosiga aanu leenahay
- Inaanu qiimeyno asluubta guriga iyo dadka kale aanu u adeegno
- Inaanu kuu gudno ballan hagaajinta ah ee aanu kuu qabaney.

## **Qaybta 2aad – Bixinta kirada iyo Housing Benefit (dalbashada benefiitka)**

Dawladda hoose waxay qorsheesaa kirooyinka aad bixin lahayd bil waliba. Haddi sii joogto aad u bixiso todobaad waliba waxaa waxaa laga yaaba in wax laga dhimo qiimaha aad kirada ku bixiso.

Kirada aa todobaadkiiba bixiso waxaa ku jira:

- Kirada caadida – kasoo ah lacagta aad ku bixiso halka aad deggan tahay
- Sicirka biyaha–biyaha aad isticmaasho iyo musqulah (Kawnsaalku wuxuu lacagtaasi u qaada shirkadaha biyaha)
- Lacagaha biyaha kulul iyo qalabka kuleyka guriga, haddii uu gurigu leeyahay nidaam nocaasi ah.

### **Isbedelka kirada iyo lacagaha kaleba**

Isbedelka ku dhaca kirada iyo lacagaha kale ee aad bixiso waxaa caadiyan laga bilaaba bisha abriil. Kawnsalka wuxuu badanaaba qora warbixin ku lug leh arrintaasi. Waibinta waxaa loo yaqaan Notice of Variation (ogeysiinta isbedelka).

### **Goorta aad bixin lahayd kirada**

Heeshiska kireystaha lala galey wuxuu ku farayaa inaad kirada bixiso maalin kasta oo Isniin ah. Waxaad kirada aad ku bixin kartaa labadii todobaadba amaba bishii, hase ahaate waa inaad:

- Waa inaad heshiis nala gasha, iyo
- Inaad markasta aad kirada iska hormariso.

### **Sidii aad u bixin lahayd kirada**

Siyaaba badan ayaad kirada ku bixin kartaa – waxaad dooran karta kolba sidii ku canfaci lahayd:

- Tooska laga goosto – Habkan waa mid kuu qalma, waxaana aad isticmaali kartaa hadii aad banki ku leedahay koonto. Mar waliba ee u isbedel ku dhaco sicirka kirada aad bixiso, wuxuu kawnsalka warqad u qori doona banki aad leedahay iyadoo loo sheegayo sicirka cusub. Wuxuu kaloo kawnsaalka kuu qori doona warqad lagugu ogeysiinayo arrintaasi muddo shan malmood ka hor inta aadan gaadhin wakhtigii kirada la bixin jirey. Tani waxay surtal gal ka dhigeysaa inaad arintaasi aad uga fiirsato. Haddii aad rabtidna inaad iska joojiso waa inaad warqad u qortaa bankiga aad koontada ku leedahay. Fadlan la xidhidh cidda ku qaabilsan dhinaca benefiitka haddii aad u baahato foomka tooska laga jaro koontada.
- Hab ka duwan kan sare – waa mid u baahan in mar kastaba ee ay kirada guriga isbedel ku dhaco waa inaad la xidhidhtaa bangiga. Waxaanu kuu soo diri karnaa foomka aad ku dalban lahayd. Haddii aad

u baahatid talo dheerad ah la xidhiidh cidda ku qaabilsan dhinaca benefiitka.

- Isticmaalka telefoonka – Waxaad ku bixin kartaa kaadhaadhka sida fiisakaadhka. Haddii aad u baahatid xidhiidh kale eeg telefoonada bilaashka fahfaahintan kadib.
- 24ka sacadood ku bixintaTelepay– Haddii aad u baahatid “xidhiidh kale” eeg telefoonada bilaashka fahfaahintan kadib.
- iPay – Waxaad ku isticmaali kartaa shabakadda kawnsaalka ee xaddidan.Waxaad u bahnaan doonta sagaalka lambar eek u ah tixraac. Isla shabakaddaasi waxaad ku bixin kartaa canshuurta kawnsaalka. – Haddii aad u baahatid xidhiidh kale eeg telefoonada bilaashka fahfaahintan kadib.
- Boostada ama PayPoint – Kaadhka bangiga u isticmaal bixinta kirada boostada maba dukaamadaha leh nidaamka PayPoint. Dhammaadka waxaa ku qoran dhowr meelood oo leh nidaamkaasi. Nidaamkan markaad isticmaashid lacagta aad bixiso waxay koontada kirada geli doonta saddex cisho kadib. Fadlan risiidhka xafid si aad uga dhigato caddeyn. Haddii aad kaadhka lumeyso, la xidhiidh cidda ku siisey si aad u hesho mid kale.

Kawnsaalka wuxuu sandkiiba kuu soo diri donra 4jeer kolba sida lagugu leeyahay kirada.Waxaa ay soo diraan bilaha januariga, abriil, juulay iyo oktoobar.Waad na soo weydiisan kartaa warbixin kusaabsan kirada. Xafisyada aanu leenahay ayaad la xidhiidhi kartaa, hase ahaate waa inaad diyaar la noqotaa caddeyntaada.Waxaad naga codsan kartaa inaanu u soo dirno cinwaakaaga.Si wanaagsan u akhriso; haddii aad qabtid wax su'aalo ah la xidhiidh qofka ku qaabilsan dhinaca benefiitka.

Haddii ay dhacdo in kontoda kirada ay ku jirto lacag dheerad ah, waxaad dalban kartaa in lagu soo celiyo. Waxaase aad yeeli kartaa in ay kugu jirto oo loo gusto kirada khiliyada soo socda.

### **Caawimo bixinta kirada –Housing Benefit (Benefiitka guriga)**

Housing Benefit (Gunnada guriga) waxaa ay dawladdu ugu deeqda dadka dan yarta ah ee ama ku nool benefiitka amaba qaata mushahar aan badneyn. Kawnsaalka ayaa ku shuqul leh. Waxaa heli kartaa gunnadaasi adoo shaqeeyaa. Waxaad heshid waxay ku xidhan tahay:

- Lacagta idin soo gala adiga iyo qofka kula nool – lacagaha loo qaato naafanimu loo ma eego dakhli ku soo galaa
- Inta qof ee kula nool ee aad mas'uulka ka tahay – inta aadan mas'uulka ka ahayn waxay dhimaan gunnada lagu siiyo (tusaale, dad kula nool ama caruur aan iskuulka ku jirin).
- Intaa aad bixin doonto – waxaa lagaa bixin doona kirada guud, ee aan ku jirin biyaha iyo nidaamka kuleylka guriga.

Waxaad ka heli kartaa foomka dalbashada Housing Benefit (gunnada guriga), xafsyada aanu leenahay amaba kawnsaalka ee ay mas'uulka ka yihiin Homes for Islington (Qaybta guryaha ee Islington).

## **Kirada lagugu leeyahay**

Maadama aanu kawnsalka u shaqeeyno waxaa wajiib nagu ah inaanu la socono kirada aad bixiso iyo in aanuu uruurino lacagta lagugu leeyahay ee (Loo yaqaan 'arrear' (khaladaad)). Waa inaad kirada wada bixisa xiliga lagaa rabo, koontada kirada ee aad leedahay waa inuusan yeelan khaladaad. Haddii aad kirada bixin weydo, waxaa aad jibisey heshiiskii kireynta waxaana dhacda inaanu talaabo ka qaadno.

### **Haddii aadan khaladaadkasi gelin waxaad ka fursan doonta:**

- Haddii lagaa saaro guriga kiro awgeed waxaa dhici doonta inuusan kawnsalka ku siin doonin guri kale.
- Waxaa dhici doonta in ay kugu adkaato sidii aad deyn u heli lahayd.
- Xukunka maxkamaddu waxaa la socda (waxay dhaawacda heerka doonista deynta) lacagta lagugu leeyahay, iyo kharashka maxkamadda. Waxayna diwaanka kugu jirtaa todoba sanadood.
- Waxaa kaloo lagu diidi karaa ibsashada guriga oo ku xidhan deymaha laga qaato bankiga.
- Waxaa kaloo lagu diidi doona bedel (guri kale aad u guurto) amaba bedelaad (inaad guriga aad kala bedeshaan qof kale).
- Waxaa kaloo lagu diidi doona inaad kireysato garaash, amaba meela aad gaadhiga dhigato. Haddii aad leedahayna, waa lagaa qaadi doona.
- Waxaa kale aad waayi doonta xaqqa aad u leedahay ibsashada guriga aad ku jirto.

### **Haddii aad gasho khaladaadka kirada**

Haddii ay kugu adkaasto bixinta kirada guriga aad ku jirto, waxaad la xidhiidhtaa cidda ku qaabilsan dhinaca benefiika, si aad talo uga heshid. Waxaanu kuu dadaali donna in aadan guriga u waayin waxaana aanu u dhaqaaqi doona dhinaca sharciga nkadib markaanu weyno xal kale.

Haddii aad doorato in aadan dan ka gelin sidii aad uga bixi lahayd dhibaataadaasi waxaa dhici doona in lacagta lagugu leeyahay laga jaro dakhliga aad ka hesho dawladda. Marka ugu horeysa waxay kuu soo diri doonan warqad ay ku farayaan inaad nala soo hadasho.

### **Talaabooyin sharciyesan ee lagu doono lacagaha**

(Haddii aan ku dhaqaaqno talaabooyinka sharciga ah ee aanu ku raadino lacagta lagugu leeyahay waxaanu ku soo diri doona Notice of Seeking Possession (Waraqadda La Wareegidda alaabta guriga kuu yaal). Haddii aad muddo afar todobaad ah ku bixin weydo lacagtaasi waxaa aanu markaasi kuu gudbin doona maxkamadda, iyadoo ay muuhim tahay inaad hor timaado. Maxkamaddu waxay noo ogolaan kartaa sidatan:

- Di u dhigid talaaboyin la qaado waxay maxkamaddu go'aan ku gaadhi karta in laguu qabto muddo bixis ah, haddii aad bixin weydon ay dhacayso in lagugu yeedho cid ka socota maxkamadda oo dabadeedna laga saaro guriga aad ku nooshahay.
- Go'aan buuxa oo ay maxkamaddu nagu siiso sharci aanu isla markaasi kuna dhaqaaqno oo lagaga saaro guriga aad ku jirto.

Haddii ay maxkama gaadho labadaasi go'aan midkood waxaa dhici doona inaad lumiso xuquuqda aad leedahay dhinaca kirada. Waxaa kaloo laga yaaba in lacag dheerad ah laga xukumo oo ah kharashkii maxkamadda ilaa iyo intii uu socday dacwadaaddaasi.

## **Qaybta 3aad – Hagajinta, dayactirka gaaska, dib uhabeyn iyo xayawaanka guriga lagu Xananeeyo**

Waxaanu mas'uul ka nahay inuu dhowro hagaajinonna gruriga aad ku jirto dibediisa, taaso ku qoran heeshiska kireynta ee aad kawnsaalka la gashey.

Markaasi weydiisato, waanu hagaajin doona:

- Qaybta dibedda ah sida albaabka, daaqadda iyo meelaha kaleba
- Meelaha biyuhu ka daadanayaan, meelaha wasaxda iyo qasaabadaha
- Khalad kasta eek u yimaada meelaha ay ka mid yihiin qasabasaha biyaha, dabka, gaaska iyo meelaha ay nadaafaddu ku xidhan tahay
- Khaladka dhinaca biyaha kulul iyo kuleylka guriga.

Haddii ay dhacdo inaad nagu yeedho khalad aad geysatay sida daacad aad jebesey waxaa dhici doonta inaanu lacag ka qaadno.

- Waxaad mas'uul katahay hagajiinta qaybo ka mid guriga sida albaaka iyo daaqadda dhinacooda gudaha ah
- Hagaajinta dhinacyada guriga gudahiisa sida qaybaha ka mid ah albaaka, fadhiga musqusha, hadhkaha birta ah ee caagata biyaha lagu awdo, blaagyada dabka iyo biraha daaha
- Qurhinta gudaha
- Hagaajinta albaabada iyo khaanadaha kijiinka
- Bagaasida lagu rido waraaqaha
- Bedelka nalalka iyo blaagyada
- Bedelka meelaha loo isticmaalo mashiinada dharka iyo alaabta maydha
- Hagaajin kasta eek u lug leh meelaha aad ka bedeshey guriga sida kijin cusub iyadoo aad mas'uul ka tahay haddii ay wax ka jabaan
- Bedelka khsnada muftaaxa haddii aad lumisey.

### **Sideebaan u sheega baahidayda hagajiiska?**

Siyaabo badan ayaad isticmaali karta sidii aad u sheegi lahayd:

- Telefoonka – laga bilaabo 8.30aroornimo ilaa 5ta, Isniin ilaa Jimcaha, waxaad garacda telefoonkayaga. Haddii ay tahay wakhti aan ahayn xilliga shaqada isticmaal telefoonka gurmdka ah. Waxaa laga yaaba inaanu sameeyno hagaajin ku meela gaadh ah iyadoo aanu kugu soo noqonno maalinta xigta.
- Shaqsiyan – Waxaad soo booqan kartaa xafiisyada aanu leenahay inta u dhexeysaa 8.30aroornimo ilaa 5ta, Isniinta ilaa Jimcaha.
- Adoo warqad qora – Waxaad u soo diri karta warqad xafisyada aanu leenahay. Hase ahaate fadlan ha soo diri warqad ku saabsan gurmada degdeg ah waayo muddo dheer ayey qaadan karta.
- Intarneetka – waxaad isticmaali karta intarneetka.

Waxaad eegta 'sidaad noola xidhidhi lahayd' haraanta boogan tusmada ah.

## **Warbixin nooce ah ayaan bixin karaa markaan sheegeyo meela hagaajin u baahan?**

Fadlan inoo sheeg:

- magaca (adoo horeysiinayaa sidaa aad u rabto inaanu kugu yeedhno)
- cinwaankaaga oo dhan
- telefoon lagaga soo xidhidho haddii aan u baahano inaanu wax dheerad ku soo weydiino
- wakhtiga kugu haboon ee aanu imaan karno
- waxyabaha garahaaneed, sida dhega cuslaan iyo inaad albaabka si dhakhsah aadan u furi karin.

## **Maxaa dhici doona haddii aan hagaajin u baahdo?**

- Haddii aad xafiiska telefoona u soo dirtid, waxaanu ku soo sheegi doona gorta aanu ku imaan doono iyo iney noqoto subaxdii amaba galabtii.
- Waxaanu kuu qori doona lamabr aad tixraac ka dhigato haddii aad u baahatid inaad mar kale nalaga soo hadasho hagaajintaasi.
- Waxaanu u sameyn doona wakhti go'an hagaajinta, iyadoo ay ku xidhan tahay kolba inta ay nagu qaadato dhamestirkiisa. Waxaa aanu kula heshiiney kawnsaalka in aan wakhti u sameyno hagaajinta aanu qabano.
- Waxaanu ku tala galnaa inaanu ku dhameeyno hagajiin waliba wakhtiga aanu u qabano.
- Marka shaqada hagaajinta la dhammeeyo, waxay shaqaaluhu ku siin doonan kaadh aad ku soo qorto sidii hawsha loo qabtey. Kaadhkaasi waxaad u soo dirtaa xafyada aanu leenahay.

## **Intee qaadan kartaa hagaajinta?**

Saddex qaybo oo wakhti leh ayaanu leenahay:

- Talaabo gurmada ah waa mid khatar iyo waxyeelo u geysan kartaa cidda guriga ku noo, sida awgeed waxaanu ku dhammeenayaa hal maalin.
- Hagaajinta degdegah waxaanu ku dhammeyn donna muddo hal todobaad ah.
- Hagaajinta caadi ah waxaanu ku dhammeyn doona 28 malmood gudohood.

## **Miyaad dayactirtan qalabka gaaska?**

Sanadkiiba, waxaanu dayactirnaa qalabka gaaska ah ee u kawnsaalka amaba qaybteena ay kuu gelisey. Hase ahaate qalabka aad adigu gashatey waa inaad iska hagaajisa, waxaase aanu kaa furi donna haddii aanu aragno inuu khatar yahay.

Dayactirka qalabka gaaska waa mid muuhim ah waayo wuxuu keeni karaa dhimasho lama fiilaan ah. Waxaanu kuu soo gudbin doona ogeysiin sheegeyaa gortaa aanu guriga kugu imaan doono.

**Haddii aad noo ogolaan weydo inaanu guriga soo galno, waxaanu arrinkaasi si degdeg ah aanu u xallino. Haddii laga fursan waayona aano maxkamadda u gudbino sii talaabo looga qaadi lahaa.**

### **Gurigayga wuxuu leeyahay uumi. Sidebaan uga joojiya?**

Guryo badan ayaa waxaa caadi u ah iney yeeshan uumi 'cindensation' kasoo ka imaanayaa kolka la isticmaalo waxyaabaha uumiga keena, siiba wakhtiga qabowga. Uumigaasi badanaaba wuxuu gala .

Waxaanu halkan ku soo qorney sida aad iska dhowri lahayd uumiga:

- Ha isticmaalin qalabka kuleyka eek u shaqeeya saalidda ee awdan.
- Dabool dusuudda, kidhligana.
- Haddii aad leedahay qalajasida dharka, waxaad u jeedisa dibedda.
- Ha awdin amba daboolin meelaha hawadu ay ka soo gasho, sida qaybaha sare ee daaqadda.
- Daaqadaha kijada iyo qolka quweyska ha ka xanib hawada.

### **Qurxinta guriga yaa mas'uul kaah?**

Waxaad mas'uul ka tahay qurxinta guriga aad ku jirto gudhiisa. Waxaad ogataa in derbiyada loo dhisey hab, waa inaad isticmaasha nooca markii hore aad ugu timid. Darbiyada ya saqafka waxaa loo isticmaale blaastik nooca cusub ee guriga ka nuuga biyaha.

Waa inaadan isticmaalin qalabka uumiga leh markaad fujineysid waraaqaha derbiga la saarey, haddii kale waxaa dhici doona in derbigu u qaato biyo faraba dabadeedna u dumo.

### **Haddiise aan u baahdo caawimo dhinaca qurxinta?**

Waa laga yaaba inaanu ku caaino, haddii aad tahay:

- 70jir amaba aad ka weyn tahay, amaba
- Aad naafa tahay qaadatidna gunno la yaqaan dhinacaasi.

Waxaa aanu leenahay nidaamka sugitaanka dadwaweyn iyo nafaahaba marka ay dalbadaan qurxinta guriga gudhiisa. La soo xidhiidh xafiiskeena.

### **Maxaan sameeya haddii cayayan ay guriga kujiran?**

Haddii aad jiir, barambaro iyo wax la mid ah, fadlan si degdeg ah inoo wargeli. Waxaa kaloo soo sheegta haddii aad xaafadda ku aragto. 'Isticmaal meelaha xidhiidhka' ah ee bilowga buugan tasmada.

## **Qaybta 4aad – Dabeecadaha ka soo horjeeda bulshada, handadaadka iyo rabshadaha Guriga**

### **Maxay yihii dabeecadaha bulshada ka hor jeeda?**

Waa 'dabeecadaha ka soo horjeeda bulshada' ee keena rabshadaha, cooladda iyagoo waxyeelo u gaysta wakhtiga nabadeed ee ay bulshadu u baahan tahay.

### **Kireystaha maxaa u xilsaaran?**

Waxaad mas'uul ka tahay dabeecadaha dadka soo gala guriga aad ku jirto, ay ka mid yihiin caruurta. Waxaad mas'uul ka tahay markay joogan guriga, meelaha u dhow iyo hareeraha meesha aad deggan tihiin. Guryaha aad ku jirti waa kuwo la cusboneysiiyey, waxaana laga dhigey guryo ay kuwada deggan yihiin dadka kala duwan. Sida awgeed waxaad kuwa noolan doonta adiga iyo jaarkuba meelo isu dhow.

### **Maxaad sameyn lahayd hadduu qof ka soo dacwo rabsho?**

Waxyaabaha ka soo horjeeda nolosha bulshada sida rabshadaha ayaan ayaanu iska xil saarna. Haddii aad soo dacwooto, waxaanu:

- Kaa qoraneynaa fahfaahin ku saabsan waxaa aad ka dacwoote
- Kuu ballamino turjubaan haddii aad u baahato
- Aanu baadhis sameyno cidda kalena loo sheego dacwaddaasi (magacaaga sheegi meyno)
- Aano meel dhigno talaabada aanu qaadi lahayn, kadib markaanu baadhitanka dhammeyno
- Inaanu la kaa shano qaybaha kale ee wax noogu tari lahaa sidii loo xaliyo arrintaasi
- Tageero iyo talooyin joogto ah
- Talaabo ka qaadno haddii aanu awoodd u leenahay
- Aanu la shaqeyno Booliska iyo qaybaha kale haddii loo baahdo.

### **Sharciyada ka soo horjeedka bulshada, waxyaabaha keena rabshadaha iyo asluubta la ogolyahay**

Waxyaabahaasi waxay inta badan waxtar u geystaa sidii looga hortegi lahaa rabshadaha. Waa in aad wada shaqeyn nala yeelata iyo waxyaha kale. Police Safer Neighbourhoods (Qaybta jarnimo wacan ee booliska). Waxaad eegta 'Xidhiidhka' dhammaadka warbixintan.

### **Dandaasigu waa maxay?**

Dandaasigu waa mid loola jeedo si badheedh ah qof amaba dad kale u keentana dhibaatooyin shaqsiyan ah.

Dandaansigu waa mid wejyaal badan yeelan karaa. Dandaansiga la xidhidha midab kala sooca waa midda ugu badan, hase ahaate dadndaansigu waa mid loo isticmaali karo ujeedooyin badan, oo ka mid qofka asligiisa.

Waxaanu aaminsanahay in u qof waliba xaq u leeyahay inuu gurigiisa ku joogo amaan anna loo geysan hanjbaad amaba rabshado. Waxaanu aad u

qadarina cabashooyinka ku lug leh dandaansiga, nooc kastaba ha ahaade, waxaanu kadib sameeynaa baadhitan culus

### **Maxaa sameeyaa haddii la i dandaansado?**

- La xidhiidh Booliska iyo Partners (Iskaashiga guryaha).
- Waxaad qorataa waxyaabaha muuhimka ah sida, taarikhda, wakhtiga, meesha, sida ay wax u dhaceen, qofka wax kuu geystey iyo markhaatiyaasha .
- Waxaad isku dayda inaad sawir aad ka qaado meelaha la kharibey (oo ka mid haddii wax lagu qorey guriga) iyo haddii waxyeelo loo gaystey alaabtaada.
- Haddii nabar laagu geyste, u tag dhakhtarkaaga amaba meelaha furan ee bukkaan socodka ah. Iyadoo inta lagu daaweyo ayaa haddan ay dhakhaatiirtu kuu qori doonan warqad sheegeyaa dhawaaca laagu gaystey, tani waxy ku tari doonta haddii maxkamad lagu gudbiyo.

### **Maxaanu kuu qaban karnaa?**

- Markaad noo gudbiso cabasho, waxaanu sameeyn doona baadhitan.
- Waxaanu qori doona fahfaahinta loo baahan yahay, kadibna aanu ku siiyo magic aad la xidhiidhi karto haddii ay dhibataadiasi lagugu soo celiyo.
- Waxaanu kuu qaban karnaa turjubaan haddii aad u baahatid.
- Talaaboyin ku haboon ayaanu qaadi doona, oo ay ka mid yihiin:
  - Dib u hagajiin amaba tirtiridda qooralada lagu xariqey guriga
  - Caawimo lagu adkeenayo amaanka guriga aad leedahay
  - Ina lagu raro guri kale
  - Talaabo laga qaado qofkii dhibaatooyinka kuu gestey, haddii laga fursan waayo laga saaro guriga.
- Waxaanu kula heshiin doona waxyaabaha aanu qaban doono. Kadib aanu qoraal kuu soo gudbino.

Haddii aad adiga amaba qoyskaaga ay noloshooda kahatar gasho, waxaanu idin gudbin doona Housing Aid Centre (Gurmadka Guryaha). Waxay kaa caawimi doonan dib u dejin ku meel gaadh ah, amaba mid joogta ah. Ma jeclin inaanu arrinkaasi ku dhaqaaqno, waxay waxaa muuhim in qofka waxaa ka dambeeya waa in sharciga lala tigsadaa. Haddii aad guriga ka baxdid waxay u arki doonan iney guuleysteen. Hase ahaate waxaa muuhim ah markastaba in amaankaaga lagu dadaalo.

### **Boolisku muxuu sameyn karaa?**

Haddii aad booliska u baahato, waxaad qaracda lambarka gurmadka 999. Haddii kale, waxaad la xidhiidhtaa qolada Safer Neighbourhoods (Amaanka ee Xaffadda). Waxaad kale heli dhammaadka warbixintan 'Xidhiidhka' qaybaha amaanka.

Boolisku wuxuu talaabo ka qaada:

- Qofka dhawaaca ku geesta
- Qofka oogan wax u geystaa guriga aad leedahay
- Haddadaad amaba dil uu kuu gesyto
- Inuu kugu la kaco handdadaad ku saleysan midab kala soc, iyadoo u qaybiyo waraaqo waxyaabahaasi fidiyaa.

Boolisku wuxu qaata warbixino buuxa qofka la soo xidhidha ee dhibaato sheeganayaa. Baadhitaan oo ay markhaatiga su'aalo ku weydiyaan ayey sameyaan. Haddii ay ku caddaato ay gartaan qofka ka dambeeyey dhibatadaasi waxay boolisku u gudbin karaan maxkammadda, haddii aad rabtid. Haddii arrinkaasi uu noqdo mid dhowr jeer lagu noqdey, waxaay boolisku kuu fidin doonan caawimo.

### **Rabshadaha Guriga maxay yihiin?**

Rabshadaha guriga waa kuwo ku xidhan dhibaatooyin qofka kale loo geysto, dhinaca maskaxda, nabaro, galmada iyo dhinaca dhaqaalaha, taaso keenta xidhiidh ah mid lagu cadaadiyo qofka kale.

Rabshadaha guriga ka dhex dhacaa waa mid ka soo horjeeda sharciga booliskuna wuxuu kugu caawimi karaa askar tababar loo siiyey dhinacaasi. Waxay ku dhaqaaqi karaan sidii ay kuu caawimi lahaayen.

Haddii ay gurmada tahay, u dir telefoon 999. Haddii kale waxaad la xidhiidha Safer Neighbourhoods (qolada Xaffadda u qaabilsan nabadgelyada). Waxaad Qaybahaasi Nabadda aad xidhiidhkooda ka heli doonta dhammadka boogan tasmada dhinaca 'Xidhiidhka'.

Haddii lagu geyste nabaro amaba handadaad, waxaad la tashata cidda kuu qaabilsan dhinaca Isbahaysiga Guryaha kuwaaso talooyin ku siin doona. Waxaa kaloo ku qofkaasi diwaan gelin karaa arrimaha aad sheegato. Haddii aad u baahatid meela gurmada ah ee aad ku nolaatid, waxay kuu gudbina karaan qaybta Housing Aid Centre (Caawiya dadka dhibaatooyinka leh).

Iyadoo aanu caawino dadka ay dhibaatooyinka soo gaadhen, waxaanu haddan talaabo ka qaadna cidda geesetey. Rabshadaha guriga waa kuwo aan loo adkeysan karin, sida awgeed waxaanu daddkaasi ka waadna talaaboyin adag. Waxaanu talabooyinkaasi qaadi karnaa oo keliya iyadoo aanu kula tashano, waxaana aanu isla meel dhigi karnaa talaaboyinka aanu ka qaadi doono. Qofkaasi hadduu ku nool yahay guryaha aanu leenahay, waxaa dhici doona inaanu ka saari garno, waayo wuxuu jebiyey heshiskii kireystaha.

## Qaybta 5aad – Ilaalinta iska horimaadkajaarka

Guryaha aanu maamulno waxaa markoodi hore lagu talagaley qof ama qoys keliya. Hase ahaate dib u habeynta cusub waxay surta gelisey in dhowr qof ay kuwada noolada meel keliya. Tani waxay keentey sida awgeed in la wada isticmaalo meela kooban oo ay dadkaasi ka wada dhexeeyso.

Waxyaabo aad rabtid ina sameeyso, waxay wax u geysan karaan dadka kale ee meesha ku noola, adoon ogaan u sameyn. Waxaanu halkan kugu sheegeynaa sidii aad iskaga dhowri lahayd jaarka waxyaabaha keena iska hor imaad.

Haddii aad dhibaatooyin la kulanto u sheeg cidda kuu qabilsan dhinaca guriga. Wuxuu kugu la talin karaan waxyaabo badan . Wuxuu kaloo kuu sheegi karaa haddii ay arrintaasi tahay mid xasaasi ah, oo u baahan in la gudbiyo laguna dhaqmo qodobka ah rabshadaha ka soo horjeedda degaanka. Waxaad fahfaahin aad ka heli kartaa qaybta ka hadlayaa 'rabshadaha loo geysto amaanka bulshada'.

### Qaylada

Qaylada amaba sanqadha waa mid si degdeg ah uga bixi karaa guriga aad ku jirto gaadhana guriga jaarka. Waa inaad ka war qabtid aadna dhinta qayladaasi. Waxaanu halkan kugu tusalenaynaa qodobo xasuus u baahan:

- Haddii aad ku nooshahay cimaarad waa in aadan dhulka gelinin loox. Dhulku wuxuu noqon doona wax adag taasina waxay keenaysaa in saqadhu kordho, waxaa marka dhacda in jaarku ay u adkeysan kari waayan.
- Haddii aad heeso dhegeysato waa inaad codka xoog u isticmaalin, waayo waxay dhibi kartaa jaarkaaga. Waa inaad ka digtoonaata waxyaabahaasi oo inta badan keena iska horimaad.
- Dadka ku soo booqda waa inaad u diida qaylada, markay kaa tagayaan siiba habeenkii amaba aroorta hore.
- Ha isticmaalin mashiinada dharka amaba kuwa nadaafadda siiba habeenkii iyo subaxda hore.
- La hadal jarka haddii aad xaflad leedahay, waana inaad ka firsataa sacaadaha dambe ee la hurdo.
- Dhegeyso jaarka, haddii ay ku sheegan in qayladu ay kugu badatey, uguna jawaab sida ugu haboon.

Haddii qaylada jaarku kugu bato, amaba ay qayladu badato habeenkii, la hadal qofka kuu qabilsan dhinana guriga, oo kuu sheegi karaa talooyin la xidhidha arrintaasi.

Haddii aad toos ula hadli kartid jaarka, waa inaad sii ay asluub ku jirto aad ugu tegtid, si degganna aad u sheegto xawaad rabto. Waxaad kula tali kartaa in ay si fiican u ilaaliyaan qaylada amaba sanqadha.

Haddii aad jaarka arrintaasi ku heshi weydan, fadlan la soo xidhiidh. Dhibaataadu haddii ay tahay mid xasaasi ah, waxaanu la tashan doona qaybta Kawnsaalka ee Environmental Health (Caafimaadka Degaanka) sii go'aan loogu gaadhi talaabada la qaadi lahaa. Waxaanu sameyn karnaa:

- Inaanu jaarkaaga u dirno warqad digniin ah.
- Inaanu weydiisano qaybta Caafimaadka Degaanka digniin Xoogan (waa digniin sharciyesan oo keenta in ganax amaba qalabka oo lala wareego)
- Inaad dalbato sharciga ka hortegista
- Markay tahay arrin culus, dalbasho la wareegid.

Waxyaabaha kale, waxaa haboon in aad adigu ka dacwoodit maxkamadda, adoo tigsanayaa Sharciga Badbaadinta Degaanka.

Haddii ay dhacdo in aadan ka dacwoon Karin qaylada habeenkii, la xidhiidh Noise Patrol (Qooxda Wareega) ee kawnsalka kuna shuquul sanqadha ama qaylada. Waxaa la helaa 8da arrornimo ilaa 2da duhurnimo Axadda ilaa Khamiista, iyo 10ka habeenimo–4ta subaxnimo Jimcaaha ilaa Sabtida. Eeg 'Xidhiidhka kale' fahfaahin dheeradka ah.

## **Ilaalinta dafaadda meelaha la maro ee kawnsalka**

Haddii meesha aad ku jirto la wadaago meelo la wada isticmaalo, la heshi jaarka sidii loo nadiifin lahaa, ay daaqaduhu ku jiraan. Haddii aad dhowaan soo degteyna, wedii jaarkaaga heshiiska ay wada galeen dhinaca nadaafadda.

Haddii ay daaqaduhu wasakh badan leeyihiin, waxaanu sameyn karnaa nadaafad hal mar ah, waayo nadafad la'aanta daaqadaha waa mid ka soo horjeeda caafimadka iyo badbaadada.

Waxyaabaha aad leedahay waa inaadan dhigin meelaha la wada isticmaalo ee kawnsalka. Haddii aad alaabtaasi dhigato waxaa dhici doona in ay xanibanto jidka loo mari lahaa dabdemiska, waxaanu kaa codsan doona in aad alaabta ka qaadid meelahaasi. Haddii aad qaadi weydona waxaa khasab ah inaanu qaadno.

## **Dayactirka meelaha la wadaago**

Haddii meelahaasi ay dayactir u baahdan, dalan nala soo xidhiidh.

## **Jardiinooyinka**

Guryaha aanu maamulno waxaa baadanaba ay leeyihiin jardiinooyin. Intabadanna, waxaa kireystayaasha lala socodsiyey cidda ku shuqul hagaajinta iyo la socodka jardiinooyinka. Waa mas'uuliyad ku saran in aadan dayicin jardiinada aad leedahay cawskana laga ilaaliyo in ay aad ugu baxaan. Haddii aad dooneyso inaad intaasi aad ogaatid, fadlan la xidhiidh qofka qaabilsan kireysteyaasha.

## Daadinta qashinka

Waa inaad xaqiijisaa ina qashinka lagu ridey bac sii wanaagsan loo xidhey intaa aadan ku tuurin qashin qubka amaba qolka qashinka haddii aad leeddahay. Haddii aadan haysanin qolka qashinka lagu qubo, fadlan qashinkaaga ka ilaali jaarka oo yey ku noqon mid dhibaato u keena.

Haddii aad haysato hanta lagu daadiyo qashinka, fadlan waxaad u soo saarta dibedda maalinta qashinka la qaado. Haddii aad la wadaagtid jaarka waa inaad la heshiisa kolba qofkii saari lahaa maalinta qashinka la ururiyo. Haddii aad qashinka ku ururisid bagaagga qashinka, waa inaad kaydisa ilaa maalinta qashinka ee todobaadkiiba.

Qashinka ha dhigin waddada inta ka horeysaa maalinta la qaado.

Haddii aad leedahay waayaabo culus ee aad rabsid in aad daadiso, fadlan la xidhidh kawnsalka, eeg 'Xidhiidhka kale' haddii aad u baahatid.

## **Qaybta 6aad – Haynta xayawaanka guriga lagu haysto**

Shurudaha kireystayaasha ee aad gashey waxay kuu ogolanayaan, haysasha laba bisadood, hale y iyo xayawaan kale ee la ogol yahay ama kaluunka ku jira quraaradda. Hase ahaate waa in xayawaankaasi aysan wax u geysan jaarka. Eyga aad leedahayna noqda mid ahayn kuwa khatarta ah.

Haddii aad ka fekereyso inaad haysato bisad ama ey, fadlan ka feker sidaad jaarka dhibaatooyinkooda aad uga ilaalin lahayd. Tusaale ahaan, haddii aad ey haysato oo aad shaqada ku maqnaato, waxaay noqoneysaa wakhti aad u dheer. Eyga mar kasta ciyaa waa mid ka cadheysiin karaa jaarka. Haddii aad ka fekereyso inaad bisad haysato, waa inaad ka fekerid sidaad uga ilaalin lahayd iney ku xaaran meelaha la wada wadaago.

Waxaa wanaagsan inaad la tashato jaarkaaga intaadan go'aan ku gaadhin haysashada xayawaanka, waayo waxaa laga yaaba iney diidan.

Haddii xayawaanka ay jaarku leeyihiin wax ku dhimaan, fadlan la xidhiidh qofka kuu qabilsan dhinaca guriga, qofkaasi oo kula heshiin doona sidaad yeeli lahayd. Haddii aanu baadhno, kadibna ogaano in xayawaanku u keeney dhibaatooyin culus, waxaanu weydisan karnaa qofka iska leh inuu u raadiyo meel kale.

Haddii aad su'aalo ka qabtid xayawaanka khatarta ah, waxaad la xidhiidhi karta Animal Welfare (Qaybta Badbaadada Xayawaanka) adoo u soo mara Public Protection (Qaybta Ilaalinta Dadweynaha) ee kawnsalka. Eeg 'Xidhiidhka kale' dhammaadka fahfahiintan.

## **Qaybta 7aad - Habaynta guriga aad kujirto**

Haddii aad dooneyso in aad wax ka bedesho qaybaha guriga, ha noqoto qaybaha biyo mareenka, amaba qaybaha dibedda waa inaad:

### **Ogataa inaad fasax uga baahan tahay Building Control (Qaybta Ilaalinta Dhismaha)**

Haddii aad dooneysid inaad wax ka bedesho qaybaha biyo mareenka ee guriga, waa inaad ogolaansho aad ka hesha Qaybta Ilaalinta Dhismaha. La xidhiidh Qaybta Ilaalinta Dhismaha ee kawnsalka; waxay ku siin doonan talooyin.

### **Hubso guriga aad ku jirtid inuu ka mid yahay qaybta guryaha amaba qayb gar ahaaned**

Guryaha aanu maamulmo waxay u badan yihiin kuwo aan wax laga bedeli kariin. Haddii guriga aad ku jirtid u kuwaasi ka mid yahay, waa inaad ku dhaqanta sharciyada u dhigan kawnsaalka. Waxaad ogaan kartaa inuu gurigaaga u ka mid yahay kuwaasi amaba warbixino kale shabakadda Qorsheynta guryaha. Eeg 'Xidhiidhka kale' dhammadka fahfaahintan.

### **Sidaad u heli lahayd ogolaansho**

Inkasto laga yaaba inaad fasax ka hesho "Planning and Building Control" (Qaybta Qorsheynta iyo Ilaalinta Guryaha) waxaa waajib ah inaad warqad noo soo qortid intaa aadan ku dhaqaaqin wax ka bedelka guriga. Haddii aad u baahatid, waa inaad soo qorta warqad, oo aad inoogu fahfahisid kolba waxaad damacsan tahay.

### **Codsiyada caadiga ah ee ogolaanshaha loo doono**

#### **Albaab amaanka**

Lama ogola inaad albaad dheerad ah ku dul sameyso albaabka dibedda, taaso keeneysaa dhibaato hadduu dab dhaco.

#### **Dhula oo loox lagu sameeyo**

Waxaa aan lagu ogoleyn inaad loox saartid dhulka guryaha ka mid ah cimaaradaha amaba lawadaago. Waayo waxaa dhacda in codku uu si degdeg ah uu kala dhex maro guryaha maadama u dhulku adag yahay, dhulka leh looxna wuxuu keena qaylo dheerad ah.

#### **Suxuunta setelaytka iyo biraha muqaalka**

Haddii aad degan tahay guryaha aan isbedelka loo fasaxin, wuxuu kawnsalka kugu amri doona in suxuuntaasi lagu dhejiyo guriga xaggiisa dambe. Haddii aad ogolaansho heshid, waxaa laga yaaba inaanu fujino haddii aanu guriga ka qabaneyno shaqo culus, kharashkana aanu kugu soo hagaajino. Haddii aad ku xidhato sixinka setelaydhka fasax la'aan waxaanu kaa codsan doona inaad fujisid, lagana yaabo in lagugu soo dalaco wixii kharash ah ee racaa.

## **Qaybta 8aad – Caymiska alaabta guriga**

Adaa mas’uul ka ah caymis gelinta alaabtaada, waxaanu kugu la talinaynaa inaad istcmaashid shirkadaha la aqoonsan yahay. Haddii uu tuug kuu dhaco amaba dab ama fataxaad timaado, waxaa dhacaysaa in alaabtaad laxado amaba ay ku kharibmaan. Haddii aadan markaasi lahayn caymis, waxaa khasab kugu noqoneysa inaad iska u bedelato alaab kale. Shirkadeena iyo kawnsalkaba mas’uul kama ahaa waxyaabahaasi. Haaddii ay kugu dhacaanna waa kuwo aad u qaali ah.

### **Marka hore baayac**

Shirkado badan ee caymiska ayaa jira, waxaase aanu kugu la talin lahayn in aad marka hore dhowr shirkadood aad isku martid. Waayo waxaa dan ah inaad marka hore eegto qiimaha si aad u hesho mid kugu haboon. Waa laga yaaba inaad u baahatid inaad kala tashato British Insurance Organisation (‘Ururka Caymiska ee waddan’). Eeg ‘Xidhiidhka kale’ haddii aad u baahatid.

### **Heeshiska loo yaqaan qaybta-saddexaad**

Waa inaad caymiska aad qaadata uu yeesha heshiiska loo yaqaan ‘qaybta-saddexaad’. Tani waxay ku tari doonta haddii adiga amaba qof ka tirsan qoyskaaga uu waxyeelo u gaysto alaabta jaarka. Haddii u jaarku dalbado dib u hagaajin kuna dalbado caymiska, waxaa aad ka bixin kartaa heshiiskaaga qaybta-saddexaad.

### **Adeegga gar ahaaneed ee kireystayasha kawnsalka**

Kansalka wuxuu maamula qorsho gar ahaaneed ee loogu tala galey kiresteyaasha. Waxaad ku bixin kartaa koontadada amaba “PayPoint” (meelaha lacagaha lagu bixiyo).

Waxaad warbixin arrintaasi ku saabsan aad ka heli kartaa xafisyada aanu leenahay amaba kuwa kawnsalka (Waxaa maamula qaybta Homes for Islington). Sii toos ah haddii aad rabto inaad la xidhiidhto qaybta caymiska ee kawnsalka, eeg ‘xidhiidhka kale’.

## **Qaybta 9aad – Badbaadinta guriga aad deggan tahay**

Waxaads gurigaaga aad ku sameyn kartaa badbaadin iyo ammaan nocyo kala duwan. Qaybtan wuxuu kuu tilmaamayaa inta muhimka ah.

### **Ka hortagga tuugta**

- Waxaad xidha daqaadaha oo dhan iyo albaabada dibedda, haddii ay xita tahay wakhti gaaban. Waayo tugu wakhti kasta ayey u soo dhacan guryaha.
- Ku xidhan muftaax daaqadaha u baahan – waa kuwo aad u jaban si wacanna ayey waxtaraan. Waa inaad ogaata mar waliba furayaasha meesha aad dhigatey, haddii u dab dhaco. Habeenkii waa inaad xidha daaqadaha u dhow qasabada.
- Furaha ha kaga tegi meelaha sida sanduuqa boostada iyo alaabka halkiisa hoose.
- Ha u dhaafi dadka aad taqaan warqad ogeysiin ah inaan ka maqnaan doontid guriga.

### **Dadka guriga kugu imaan karaa**

Shaqaalaha inoo shaqeeyaa waxay sitaan aqoonsi. Shaqaalaha kale ee ka socda korontada iyo gaaskaba, waa iney iyaguna siitan aqoonsi. Markastaba waa inaad aqoosi gooda weydiisid, xitaa haddii ay ballan kula leeyihiin. Qofna ha u ogolaan guriga ilaa iyo inta aad ku kalsoonaatid waxay u socdan. Haddii u qof kuu yimaado si degdeg ahna kaa tago markaad wax weydiisid, si degdeg ah la socodsii booliska.

Ka hortagga dhibaatooyinka ee booliska waxay mar kastaba diyaar kula yihiin talooyin la xidhidha arrintaasi. Waxay kaloo kaa caawimi karaan haddii aad dooneyso inaad bilowdiig Qorshaha Badbaadinta jaarka.

### **Iska ilaalinta dabka**

Inta badan dab ka dhaca guryaha waxaa sababa waxyaabo aan loo firsan, ee waa i inaad racda taladan:

- Hubso in sigaarka uu sii fiican u baxtiyey intaa aadan meel ku daadin.
- Adoo jiifa sagaarka ha cabin.
- Dharka ha qalajin mashinada cuntada amaba kuwa kale.
- Kibriidka ka ilaali caruurta.
- U sameeyey ilaalinta dabka, meelaha dabka leh.
- Markaa aadan istcmaalin qalabka ku shaqeeya korontada, waa inaad baxtiisa aadna dabka ka saartid.
- Eeg meelaha khatarta ee waayarada ee korontada–blaagyada iyo meelaha gala qalabka iney kulul yihiin, fiasaska sida lama filaanka ah u qarha, nalalka oo kola isbaxtiya, iyo calaamado ku soo baxa halka blaagyada.
- Albaabada wada xidh inta aadan seexan.

- Ka digtonow markaad shiileyso baradhada amaba kaluunka. Waa in aadan ka tegin digsa aad wax ku shiileyso. Haddii u dab qabsado, waxaad ku daboosha maro qoyan – biyo ha kuu daadin digsigu saliida leh.

Markaanu shaqo weyn ka qabano guriga aad ku jirto, waxaanu kuu gelin doona alaarmka dabka. Waa inaad kolba eegta baateriga, haddii ay dhammaadna waa inaad bedeshaa. Intooda badan waxay leeyihin badhan la riixo ee lagu qiyaaso iney shaqeenayaan.

### **Haddii u dab qaco**

- Haddii ay macquul tahay albaada xidh si uusan dabku u fidin guriga intiisa kale.
- Dhamman dadka ka wada saar uriga si degdeg ah.
- La hadal qaybta dab demiska 999 adoo siinayaa cinwaanka saxa ah ee aad joogtid. (Isticmaal telefoonka jaarka amaba kuwa shacabka ee wadooyinka, ee marnaba ha ku noqon guriga.)
- Dibedda waa inaad joogta ilaa iyo inta u dab demiska kuu sheego iney caadi tahay.

### **Nuuradda cad ee guriga**

Qaybaha cusub eel eh nuuradda celisaa dabka khatar u ma ahaa cafiimadka dadka. Waxyaabaha ay kujiran nuuraddaasi waad haysan kartaa hase ahaate waa inaad ranji dul marisaa. Qaybaha leh nuraaddasi waa la hagaajin karaa. In guriga laga saaro waa talaabada ugu dambaysaa.

- Ha qodin waxyaabaha aad u maleenayso iney leeyihin nuraadaasi.
- Saqafka ha isku deyin inaad ka xoqdiid waxaa dul marsan. Maydh meelaha ranjigu ka dhacay intaadan ranji cusub marin.
- Ha isku dayin inaad fujiso waxyaabaha gaboobe ee dhulka yaal. Meeshooda kaga tag haddii aad u baahatona dul saran waxaa cusub ee dooneyso.
- Haddii aad ka shakido in qaybo leh nuuraddaasi iney waxyeelo gaadhen, fadlan nala soo xidhiidh.

## **Qaybta 10aad – Xaqa kireystaha oo kooban**

Haddiiba aad tahay qof guriga ka kireystay kawnsalka, waxaad ogaata in heshiiska kireystaha uu yahay mid leh saldhig adag. Heshiiskaasi wuxuu ku siinayaa xuuq kala duwan. Qaar waa kuwo gaar ahaaneed oo ku tigsan sharciyada aanu dhigno, inagoo ah cidda ka kireysay guriga.

### **Xuuqda kireystaha sugan**

Sharciga guryaha ee 1985 wuxuu ku siinayaa:

- Badbaadada heshiiska kawnsalka ee aad leedahay
- Sharciyo u ogolaanayaa cidda aad ka kireysatey guriga, u awood u yeesho inuu kaa saaro guriga haddii aad fulin weydo sharciga kireystayaasha.

Waxaanu maxkamadda u gudbinayaa dacwada aanu qabno, markaanu isku dayno wax waliba uu kartideena ah. Haddii aanu go'aan ku gaadhno inaanu sharciga kula tigsano, waxaanu raaci doona nidaamka yaal, markastana aanu kula socodsiiyo kolba halkay xaaladdu marayso.

### **Isbedelka heshiiska kireystaha**

Sharciga guryaha ee 1985 wuxuu siinayaa kireystayaasha, inuu yeesho awood bedelka heshiiska. Sharciyadan waa kuwo adag, waxaana lagu ogolaan karaa oo keliya haddii aad caddeeyso inaad aqoon u leedahay. The name of the organisation "Animal Welfare" needs to be in English, followed by the Somali translation in brackets.

### **Xuquuqda la wareegga heshiiska**

Haddii aad tahay kireyste leh heshiis sugan, waxaa aad xaq u yeelan kartaa (la wareegid) haddii ay dhimasho timaado:

- Haddii heshiiska aad la leedahay qof kale, waxaa dhacda inuu qofkaasi la wareego guriga.
- Haddii xaaskaaga/ninkaaga uu kula noola, markaad dhimato ayey la wareegi doonan guriga.
- Haddii aad leedahay qof kula deggan amaba wiil ama gabadh aad dhashay oo ay kula noolaayeen 12 bilood ka hor dhimashadaada, waxay xaq u leeyihiin in ay heshiiskaasi la wareegan.

Qofka raba inuu heshiiska la wareego waa inu caddeeyaa wuxuu yahay, halka ay ku nool yihiin iyo waxaad isu tihin, marka aanu weydiino. Haddii gurigu u ka weynaado baahida la wareegga, waxaanu codsadaynaa inuu galo guri ka yar.

Sharciyan, la wareegga heshiiska mar keliya ayuu dhici karaa.

### **Xuquuqda heeshiska kireystaha oo keliya**

Haddii aad haysato heshiis sugan oo aad rabto inaad guriga ka tagto kuna noolatid meel kale, durufo qaar wuxuu sharcigu kuu ogolyahay inaad ku wareejiso heshiiskaasi qof kale. Waxaa keliya aad ku 'warejiin kartaa' dadka xaqa u leh la wareegga heshiiska (ee qaybta la wareegida). Haddii aad heshiiska kala waregtey qof dhintey xaq u ma lihid inaad ku wareejiso cid dambe.

Haddii aad rabtid inaad ku wareejisid, waa inaad racda qodobadan:

- Waa inaad fasax aad heshid inta aadan guriga ka tegin, waayo waxaanu kuu diidi donna haddii (aad guriga ka baxdo).
- Waa inaad qoraal codsasho ah no soo qortaa, adoo ku caddeynayaa fahfaahinta qofka aad rabtid inaad ku wareejiso heshiiskaaga.
- Waa inaanu marka hore helna caddeyn in labadiinaba aad rabtaan kala wareejitsaasi.
- Waa inaad na tustaa aqoonsi, sheegta halka aad degan tahay, iyo waxaad isu tihii qofkaasi, haddii aanu idinka codsano.
- Waa inaad wada bixisa lacagaha kirada ee lagugu leeyahay.
- Si deg deg ah ayaanu kula xidhidhi doona kadib markaanu helno codsigaaga oo dhameystiran.

